

## Helitaanka Daryeelka Ilmaha Tayada Sareeya

Helitaanka daryeelka tayada sare ee daryeelka ilmaha waa mid ka mid ah go'aamada ugu muhiimsan ee qoys uu weligii samayn doono. Sayniska waxa uu muujinayaa in sanadaha hore ee nolosha carruurnimadu ay yihiin kuwa ugu muhiimsan marka ay timaado caawinta u diyaarinta carruurteena guusha dugsiga iyo wixii ka dambeeya.

***Waxaan doonaynaa in aan hubsano wakhtiga ay carruurteenu ku qaataan daryeelka ilmahu in uu yahay wakhti si wanaagsan loo qaatay.***

Child Care Aware of Washington waxay ballan qaaday in caawiso qoysaska in ay helaan daryeel carruurta ah oo aad u fiican iyo ka caawinta adeeg bixiyayaasha daryeelka ilmaha gobolkayaga in ay gudbiyaan daryeel tayo sareeya. Waxaa mahadsan Early Achievers, qiimaynta tayada Washington iyo horumarina nidaamka. Waalidka hadda waxay leeyihiin nidaamka qiimaynta oo oo si fudud loo fahmi karo si ay uga caawiso iyaga in ay sameeyaan ikhtiyaaro daryeelka carruurta oo aad looga war qabo.



## La xidhiidh Child Care Aware Xarunta Qoyska WA si aad u bilowdo badhitaankaaga wixii taoy sare leh ee aagaaga ah.

Wac 1-800-446-1114 ama onlayn ahaan ku booqo:
http://childcareawarewa.org/families

Sidoo kale, iska hubso in aad booqato Department of Children, Youth, and Families ilmaha eeg https://www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/child-care-check si aad wax badan uga ogaato macluumaad qoto dheer oo ku saabsan bar-naamij kasta oo daryeelka ilmaha oo aad ka fekerayso.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Child Care Aware®
OF WASHINGTON
FAMILY CENTER

Child Care Aware®
OF WASHINGTON



**Child Care Aware of Washington waxay kuxirtay qoysaska xanaano tayo sare leh in kabadan 30 sano**

Ilaha daryeelka ilmaha aadka loo aaminsanyaay Washington

WASHINGTON
EARLY ACHIEVERS
PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL



## Early Achievers, Washington Qiimaynta Tayada iyo Nidaamka Horumarinta

Early Achievers waa mid dhammaystiran, goboladoo dhan, barnaamij cilmi baadhid ku salaysan taas oo bixisa taageero lacag la'aan ah iyo ilo, sida tababarka iyo wax u dhigista, adeeg bixiyayaasha daryeelka carruurta sidaasna waxay ku samayn karaan horumar barnaamijkooda ah. Kumanyaal adeeg bixiyayaasha ah ayaa ka qayb galaya mid gobol koo dhan ah, oo gaadhaysa in ka badan 74,000 oo carruur da' yar ah maalin kasta.

Early Achievers waa adeeg bixiyayaal nidaamka qiimaynta tayada oo ay fududtahay in la fahma. Nidaamka qiimayntu waxa uu ka caawiyaa qoysaska in ay helaan barnaamijyada daryeelka ilmaha kuwaas oo qayb ka ah dedaalada joogtada ah ee horumarinta tayada oo ay tayadooda ansixiyeen Jaamacada Washington.



## Fahanka Qiimaynta Early Achievers

Early Achievers waxay qiimeeyaan tayada daryeelka ilmaha iyo barnaamijyada barashada hore ee qiyaasta 1 ilaa 5. Heerka 1 si fudud macnaheedu waxa weeye barnaamijka daryeelka ilmaha looma diiwaan geliyo Early Achievers.

Heerka 2 sbarnaamijyada waxay ka qayb galayaan horumarka tayada ee iskaashiga taageerada tababarka iyo dhiirigelinta.

Heerarka 3-5 waa qodobada ku salaysan oo lagu kasbaday qiimaynta goobta ah oo ay qabato Jaamacada Washigton.

Heerka 3 barnaamijyadu waxay muujiyaan taageerada is dhexgalka barbaarinta carruurta, koboc ahaan dhaqanada ku habboon iyo aragtiyada waalidka sidii shuraako barashada carruurtooda ah. Barnaamijyadan waxay hirgelinaysaa qaar ka mid ah dhaqanada ugu wanaagsan ee waxbarashada hore carruurnimada (ECE) iyo ka shaqaynta dhanka hirgelinta kuwa kale si ay u caawiyaan ud iyaarinta carruurta dugsiga barbaarinta. Shaqaalaha qaarkood haystaan digriiga gaarka ah ee ECE iyo caddaymo.

Level 3+ Barnaamijyada Heerka 3+ waxay ku guuleysteen heerar sare ee jawigooda iyo qiimeynta is dhexgalka oo waxay si caadi ah u hirgaliyeen dhaqamo heer-sare ah. Tusaalooyinka wax-qabadka heerarka sare waxay ku kala duwanaan karaan goob ahaan, oo waxaa ku jiri kara manhaj tayo sare leh iyo waxbarasho la gaareeyay oo dhammaan carruurta. Adeeg bixiyeyaasha heerka 3+ ayaa si firfircoon u muujinaya tayada barnaamijyadooda iyada oo loo marayo is-dhexgal tayo sare leh oo lala yeesho carruurta iyo ka qeybgelinta jawiyo waxbarashada.

Heerka 4 barnaamijyadu waxay beegsanayaan u diyaarinta carruurta dugsiga barbaarinta, tageerida koboca guud ee carruurta gaarka ah oo waxaa ku jira waalidka barashada ilmahooda iyo qorshaha koboca. Macalimiinta barnaamijyadan waxay wakhti u leeyihiin in ay qorsheeyaan oo abuuraan deegaan xoogan oo waxbarasho iyo manhajka. Shaqaalaha qaarkood waxay haystaan digriiga gaarka ah ee ECE iyo caddaymo.

Heerka 5 barnaamijyadu waxay muujiyaan is waafaqsanaata dhaqanada ugu wanaagsan oo la xidhiidha natiijooyinka ilmaha ee suuban ee carruurta oo waxa ku jira dhaqan qoto dheer leh sida loo gaar yeelo waxbarashda/taageerada ilma kasta iyo qoyska ku salaysan macluumaadka laga soo ururiyay barnaamijka. Macalimiin badan oo barnaamijkan ah waxay haystaan digriiga gaarka ah ee ECE iyo caddaymo.



## Early Achievers waxay qiimaysaa barnaamijka daryeelka ilmaha afar dhinac

- Natiijooyinka Carruurta
- Manhajka, Deegaanka Barashada iyo Is dhex galka
- Horumarka Xirfadeed iyo Tababarka
- Ka qayb galka Qoysa iyo Iskaashiga



Mid ka mid ah oo dhinacyadan ah waxa uu daboolaa qaybo muhiim ah tayo aad u saraysa oo daryeelka ilmaha—waxyaabaha run ahaantii waxay faraq u sameeyaa carruurta yar yar. Ka feker iyaga sida dhaqanada wanaagsan ee barashada hore.

Qaar ka mod ah Adeeg bixiyayaasha Early Achievers waxay ku takhasuseen dhinacyo muhiim ah oo korinta carruurta ah. Goobaha gaar ahaanshahu waa:

- Is dhex galka iyo Deegaanka
- Manhajka iyo Taageerada Shaqaalaha
- Xirfad Yaqaanimada Shaqaalaha
- Ka qayb galka Qoysa iyo Iskaashiga
- Natiijooyinka Carruurta